Camden waa meel cajiib ah oo wax lagu barto, waxaana ku faannaa iskuulaadan heerka sare ah iyo shaqaalaheenna oo maalin kasta si adag uga shaqeeya inay carruurta siiyaan waxbarashada ugu wanaagsan.

Waxaan rabnaa in ilmo kasta oo Camden ah uu helo meel dugsi oo maxalli ah oo ku habboon baahiyahooda fasal buuxa si loo siiyo jawiga ugu fiican ee ay wax ku bartaan, ku samaystaan saaxiibo oo ay ku horumaraan.

Iskuulada ku yaalla Camden iyo guud ahaan London ayaa wajahaya cadaadis dhaqaale oo sii kordhaya.

Hoos u dhaca heerka dhalmada iyo qoysaska ka guuraya London ayaa keenay in ay yaraadaan carruurta buuxin karta boosaska iskuulada; taas oo sababtay in tirada ardaydu ay yaraato, iskuuladana ay yeeshaan boosas bannaan oo dheeraad ah.

Boos kasta oo banaan wuxuu ka dhigan yahay in iskuulada hoose ay sannadkii lumiyaan celcelis ahaan £7,500 oo ka mid ah maalgelinta muhiimka ah ee Dowladda, halka iskuulada sare ay lumiyaan celcelis ahaan £9,700 sannadkii.

Golaha ahaan, waxaa naga saaran waajib ah inaan xaqiijinno inay jiraan kaalmo waxbarasho oo ku filan, tayo sare leh, isla markaana waara, iyo inaan si hufan u maamulno kaalmahaas waxbarasho.

Maadaama tirada ardaydu ay hoos u dhacayso, waxaa lagama maarmaan ah inaan arrintan u maamulno si dhow oo aan isaga kaashanayno iskuulada.

Sanadkii la soo dhaafay, iyadoo qayb ka ah Barnaamijkeenna ku saabsan Tayeynta iyo Dhammaystirka Baahiyaha Iskuulada, waxaan si dhow ula shaqeynaynay dugsiyada si gaar ah ay u saameeyeen arrimahani, si aan uga taageerno inay wax ka qabtaan caqabadahan.

In kasta oo ay jirto dadaal ay sameynayaan dhammaan dhinacyadu, haddana afar dugsi ayaa weli wajahaya cadaadis aad u daran oo joogto ah – kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- boosas badan oo banaan
- tirada ardayda oo sii yaraanaysa
- boosas dheeraad ah, iyo;
- cadaadis dhaqaale oo sii kordhaya.

Iskuuladan waa:

- St Alban’s Church of England Primary School
- St Patrick’s Catholic Primary School
- St Patrick’s Catholic Primary School
- La Sainte Union Catholic Secondary School

Waxaan si dhow ula shaqeynaynay iyaga si aan uga wada hadalno tallaabooyinka xiga.

12kii bishii Tobnaad 2026, waxaan daabacnay warbixin ku talinaysa in la sameeyo wadatashi ku saabsan mustaqbalka iskuuladan.

Taariikhdu markay tahay 20kii bishii Tobnaad, xubnaha Golaha Fulinta ee Camden – oo ah kooxda xildhibaannada hoggaaminaya – ayaa kulmi doona si ay u eegaan warbixintan, una go'aansadaan in la sii wado wadatashiyadan iyo in kale.

21kii bishii Tobnaad, waxaan dugsiyada iyo dhinacyada ay khuseyso la wadaagi doonnaa go'aanka iyo tallaabooyinka xiga.

Haddii wadatashiyadu qabsoomaan, waxay u badan tahay inay socdaan laga bilaabo 2dii bishii Kow iyo Tobnaad ilaa 14kaa Laba iyo Tobnaad.

Kadib, waxaa iskuulka kasta loo qaban doonaa wadatashi, qoysaskana lagala tashan doonaa xulashooyin kala duwan.

**Haddii wadatashiyadu ay qabsoomaan, kuwani waa xulashooyinka wadatashiga ee loo soo jeediyay iskuul kasta:**

**St Alban's Church of England Primary School options:**

- Dhimista Tirada Ogolaanshaha ee La Daabacay (PAN)
- Isku-daridda iskulka kale oo hoose oo ku yaalla Camden, taas oo lagu sameynayo iyada oo la xirayo iskuulka St Alban's, ardaydana loo wareejinayo iskuulkada kale.
- Xiritaanka iskuulka

**St Joseph's Catholic Primary School Ikhtiyaar/doorasho:**

- Dhimista Tirada Ogolaanshaha ee La Daabacay (PAN)
- Xiritaanka iskuulka

**St Patrick's Catholic Primary School Ikhtiyaar/doorasho:**

- Dhimista Tirada Ogolaanshaha ee La Daabacay (PAN)
- Isku-daridda iskuul kale oo hoose oo ku yaalla Camden, taas oo lagu gaarayo iyada oo la xirayo iskuulada St Patrick's, ardaydana loo wareejinayo iskuulaadaas kale.
- Xiritaanka iskuulka

**La Sainte Union Catholic Secondary School Ikhtiyaar/doorasho:**

- Dhimista Tirada Ogolaanshaha ee La Daabacay (PAN)
- Isku-xirnaan lala yeesho iskuulka sare oo kale
- Xiritaanka adeegga iskuulka ee fasallada 7 ilaa 11 oo keliya, iyo isla markaana sii haynta iyo dib-u-habeynta adeegga waxbarashada ee ka dambeeya da'da 16-ka sano (fasallada 12 ilaa 13/14).
- Xiritaan dhammaystiran oo iskuulka ah, fasallada 7 ilaa 13/14

Waxaan hadda ka shaqeyneynaa qorshe lagu xaqiijinayo in, haddii wadatashiyadu ay qabsoomaan, waalid kasta iyo qof kasta oo xannaaneynaya carruurta ay fursad u helaan inay fikirkooda dhiibtaan.

Waan ognahay in tani ay tahay wax adag in la maqlo, balse waa inaan hadda tallaabo qaadnaa si aan uga hortagno in xaaladdu ay sii xumaato, isla markaana aan u ilaalinno adeegga waxbarasho ee tayo leh ee aan u hayno dhammaan carruurta, haatan iyo mustaqbalkaba.

Wax badan ka ogow, oo ay ku jiraan xulashooyinka la-talinta la soo jeediyay ee dugsi kasta, su'aalo iyo jawaabo, iyo macluumaadka xiriirka **camden.gov.uk/SchoolProposals**

Waxaan bixin doonnaa warbixin kale 21kii bishii Tobnaad.